



## Rajeynaya in la gaaro gu'ga

Waan idin salaamayaa kuna soo dhawaada waxa aan rajeynayo in uu noqdo neefsashadii u dambaysay ee jiilaalka. Sanadkan waxaa ina soo wajahay baraf, biyo baraf noqday, dabayl iyo roob aan hore loo arag. Jiilaalkii wuxuu naga dhigay in aan sagaal maalmood ka maqnaano dugsiga, Anigu, qof ahaan, waxaan rajeynayaa in la gaaro gu'ga.

Si dib loogu helo maalmahan waxbarasho ee inaga lumay waxaan wax ka bedel dhowr ah ku samaynay jadwalka. Wax ka bedelka kama dambaysta ah waxaa la sameeyay Maarso 7deedii markii ay Guddigu u codaysay in la bedelo maalinta qorshaynta la sameeyo ee Abriil 7deeda oo laga dhigo maalin waxbarasho, iyo sidoo kale in sanad dugsiyeedka lagu kordhiyo hal maalin oo dheeraad ah oo noqonaysa Khamiis, Juun 15keeda (jadwalkani isbedelay wax saameyn ah kuma yeelanayo taariikhaha qalin-jabinta ee ardayda sanadkii u dambeeyay dhiganaysa).



2017-ka wuxuu ilaa iyo hada muujiyay in uu yahay mid mashquul u ah PPS, hoosta waxaa ku qoran qaar ka mid ah waxyaalaha u muhiimsan:

- Febraayo 28keeda: Ka dib bilo badan oo la isku soo ururinayay fikradda ay qabto bulshadu, Guddigu waxay u codaysay in la gudbiyo xeerka [Maalgelinta Daymeed ee Caafimaadka, Badbaadada, iyo Casriyeynta ee 2017-ka](#) si cod bixin loogu qaado Maajo;
- Waxaan maamulayaasha kala shaqaynaynay [sida loo illaaliyo ardaydeena haddiiba ay dhacdo in wakiilada federaalku u soo dhawaadaan dugsiga](#), ama hawl la fulinayaa ay ka dhacaan bulshada dhexdeeda.
- Jimce, Maarso 3deedii: Guddigu waxay ku dhawaaqday go'aankeeda [in ay dalacsiiso Dr Donyall Dickey in uu noqdo qofka keliya ee sida kama dambaysta ah u soo baxay isaga oo noqonaya Maamulaha soo socda.](#)

Guddiga sharci dejinta ee Oregon waxay kulan ku yeelanayeen Salem tan iyo horraantii Febraayo. Waxay la tacaalayaan miisaaniyad la saadaaliyay oo hoos uga dhacday intii la filayay ku dhawaad \$1.7 bilyan. Waa xilli hore in la sheego dhab ahaantii waxa ay saameynta hoos u dhaca miisaaniyadu ee baaxad leh ay ku yeelan doonto dugsiyadeena, laakiin waa in aan u diyaar-garownaa in aad samayno kala doorashooyin adag. Maamulayaashu waxay labada toddobaad ee soo socda dib eegis ku samayn doonaan xaalada miisaaniyadayada u dambaysay, waxaana Guddiga loo soo bandhigi doonaa Talaadada, Maarso 14keeda.

Waxaan sidoo kale ku biiraynaa dugsiyada kale ee degmooyinka Oregon Isniinta, Maarso 13keeda taasi oo ka dhacaysa Salem si aan sharci-dejiyayaasha ugala hadalno sida ay muhiimka u tahay in la illaaliyo maalgelinta waxbarashada dadweynaha. Sharci-dejiyayaasha waxay qaban doonaan dacwad dhageysigii u horreeyay oo ay dadweynuhu ka qayb qaadanayaan oo lagaga hadlayo miisaaniyadda K-12 taasi oo dhacaysa Khamiista, Maarso 16keeda. Waxaan qoysaska PPS idinku dhiirigelinaynaa in aad sharci-dejiyayaasha kala hadashaan sida ay miisaaniyadda K-12 muhiimada ugu leedahay ardaydeena iyo bulshadeena.

Nidaamku waa mid isbedela wuxuuna ku xiran yahay saadaasha dakhliga gobolka. Ka dib marka canshuuraha si buuxda hawshooda loo qabto—dabayaaqada Maajo—gobolku wuxuu heli doonaa sawir cad oo ku saabsan dakhliga. Waan kula soo socodsiiin doonaa marka aan dejino miisaaniyadayada loogu talagalay sanad dugsiyeedka 2017-18-ka iyadoo ay ku xiran tahay hadba macluumaad wanaagsan ee aan ka heli karno gobolka.

Bob